**The Glasgow City Council**
**(Sighthill)**
**(Traffic Management and Parking Controls) Order 202_**

**SU,ALAHA MAR WALBA LAYS WEYDIIYO (FAQ,s)-KONTOROOLKA BAARKINKA**

# AAGA BARKINKA XADIDAN (RPZ)

## MAXAA LASOO JEEDINAYA?

Waxaa lasoo jeediyay in aaga Sighthill ay yeelato baarkin xadidan (RPZ).
RPZ waxaa loo sameyay in lagu caawiyo si loogu fududeyo ciriiriga baarkinka xaafadaha la degan yahay iyo in la yareeyo gaadiidka gaarka loo leeyahay ee u socda aagagaan, lana ciribtiro xannibaada baarkinka iyo kuwa aan kala sooca laheyn.
Kontoroolka baarkinka waxaa lagu soo koobi kara sida tan.

- Isticmaalka baarkino ay wadaagi karaan dadka degaanka, ganaacsatada iyo booqdayaasha.

- Ogolanshaha baarkinka dadka degaanka waxay ku kacaysaa qiimo dhan £98 sanadkii ama £27 sedex bilood mar (in ka yar £1.89 isbuucii sanadkii)

- Ogolaanshaha baarkinka ganaacsatada waxaa lagu heli karaa qiimo dhan £650 sanadkii (in ka yar £2.50 maalintii, ku saleysan isbuuca 5 maalmood), sida qeybaha kale ee magaalada.

- Ogolaanshaha baarkinka booqdayaasha waxaa heli kara dadka deegaanka si ay ugu iibiyaan martidooda.Tani waxaa lagu heli karaa baakado 5 ah, oo taas u qiimaheedu yahay £10 - £2 hal kii vouche(waraaqaha lacag ahaanta loo isticmaalo) voucher kasto wuxuu shaqeynaya mudo 6 saacadood a, wuxuuna ka sameysan yahay kaarka la xoqo.

- Qorshayaal ayaa la hirgelinaayaa si loo soo bandhigo nidaam cusub oo ku shaqeeya korontada taas oo u ogolaaneysa dadka degaanka in ay uga gadaan martidooda sacadaha barkinka qadka tooska ah (online).
- Bixi oo soo bandhig, ugu badnaan aad ku joogi karto 3 saacadood qiimaheeduna u yahay 40p 15 daqiiqo kasto.

- Meelo loogu talo galay naafada iyo rarida gawaarida.

- Waqtiyada kharashka baaarkinka la adeegsan doono waxaa lasoo jeedin doonaa in ay noqoto isniinta ilaa axada 8:00am ilaa 10pm, tan waxaa laga yaabaa in la yareeyo ayadoo ku xiran jawaab celin.

- Ma jiro kusugitaan waqti kasta oo ka baxsan meelaha baabuurta la dhigto.

- Xadka xawaaraha 20MPH ee qasabka ah ayaa lagu soo bandhigi doonaa aaga oo dhan.

**Ma dhigan kara meelaha ka baxsan meelaha loo calaamadeyay in lacag lagu bixiyo?**

Maya. Xaddidida loo sameyay meelaha calameysan ee baarkinada waxay tahay ‘in waqti kasta lagu sugi Karin’ sidaa darteed waa uu shaqeyaa mar walba waxaana lagu soo afjari karaa sidaas.

**Calaamad malagu dhejin doonaa si ay tan u muujiso ?**

Haa.waxaa lagu xiri doonaa calaamadaha soo gelida iyo ka bixida ah oo ku tusineysa Meesha uu  RPZ ka biloowdo iyo Meesha u ku dhamaado.calaamadaha gelitaanka ayaa tilmaameysa in baabuurta ama gawaarida ay dhigtaan oo keliya meelaha saxeexan.

## Meelaha baabuurta ama gawaarida la dhigto.

**Waa maxay meelaha baabuurta la dhigto oo la wadaago?**

Meelaha baaburta la dhigto oo la wadaago waxaa isticmaali kara dadka haysta ogolaanshaha iyo kuwa raba in ay bixiyaan lacagta baarkinka,tani waxay ka dhigeysaa iisticmaalka ugu fiican ay isticmaalaan gaarileyda ah ayadoo mudnaanta siineysa baarkinka dadka deegaanka, waxay kaloo siisa so booqdayaasha deeganka iyo kuwa waqtiga yar baarkinka isticmaalo in ay u dhowaadan xaruumaha ganacsiga, baaburta leh calaamada naafada waxay sidoo kale dhigan karaan meelaha baarkinka la wadaago lacag la,aan iyo waqti aan xaddidneen.

**Maxaan u yeelan weynay Meesha baabuurka la dhigto oo dadka deeganka keliya u gooni ah?**

Golaha waa in uu had iyo jeer ku xisaabtamaa rabitaankiisa balaaran iyo ujeedoyinkiisa istratiijiyadeed isagoo tixgelinaaya baahida aaga deeganka. Waxaan raadineynaa taas in aan ku gaarno abuurista bulshooyin la heli karo, dhiiragelinta kobaca dhaqaalaha ayadoo la taageeraayo ganacsiga maxalliga ah iyo fursadaha waara ee safarka baabuurta.Isticmaalka baarkinka deegaanka keliya waa mamnuuc iyo isticmaalka aan wanaagsany oo ah meel wado yar oo kooban, waxay kasoo horjeedaa ujeedooyinka golaha sidaa darteed lama tixgelin karo.

**Mala ii damaanad qaadayaa meel baarkin ah oo u dhow gurigeyga?**

Sidoo kale wado kaso waxaa jira oo keliya awooda baarkinka xaddidan si kastaba ha ahaatee kontroolada baarkinka waxay mudnaan siin doonaan baarkinka deegaanka waxayna kordhinayaan helitaanka meelaha baabuurta la dhigto ee ku haboon guud ahaan.

**Waxaad dhimeysaa awooda baarkinka wadadeyda, maxaa sidaas u sameysay?**

Kontroolada baarkinkaan waxay kordhiyaan bixinta baarkinka halka ay suurtagal tahay, hase yeeshee meelaha baarkinka waxaa la sameyn karaa oo keliya marka ay nabad galyo tahay in la sameeyo; badbaadada waddooyinka iyo dadka lugaynaya waa in la tixgeliyo marka la qorsheynaayo in la sameyo meelaha baabuurta la dhigto.arimo ay ka mid yihiin baabuurta la dhigto meel aad ugu dhow isgoosyada, geesaha wadooyinka,Meesha shacabka maraan iyo

aaga leexashada waa in wax laga qabtaa, tani waxay caqabad ku noqon kartaa gelitaanka gawaarida alaabta wada, kuwa wadada nadiifiya iyo baabuurta adeegyada degdega ah. Waa in la tixgeliyaa sida ay wadada u sameysan tahay sida meelaha baarkinada angalka ah, meelaha lagu leexdo o leh gelida iyo ka bixida waa in aay ahaataa meel la heli karo oo faahfaahsan.

## Ogolaanshaha baarkinka

**Yaa u qalmo ogolaanshaha baarkinka deegaanka?**

qof kasto oo ku nool aaga uu saameyay iyo guryahay la dhameeeyay ka hor inta baarkin zoonka la ansaxin, wuxuu codsan karaa ogolaansho baarkin ah inta gaari ku qoran adreeskiisa, hadii gurigaada uu ka mid yahay guryaha cusub oo la dhisay baarkin zoonka ka dib ma heli kartid ogolaansho baarkin ah.

**maxay sababta aad ugu  dalacayso ogolaanshaha baarkinka dadka deegaanka?**

Siyaasadeena waa in aan hubino in kharashaadka maamulka iyo ku dhaqanka kontroolada baarkinka wadooyinka lagu bixiyo kharashka baarkinka ee Meesha yaalo. Maadaama uu jiri lahaa dakhli kasoo gala bixi oo soo bandhig iyadoo ay ugu wacan tahay isticmaalka la wadaago meelaha baabuurta la dhigto markaas qiimaha ogolaanshaha baarkinka ee dadka deegaanka waxey noqon kartaa £98 sanadkii.

**Meeqa ogolaansho baarkin ayaan gadan karaa?**

Baabuur kasta gurigaada ku qoran waxaa u gadan kartaa hal ogolaansho,
Laakiin fadlan ogoow guryaha dadka badan degan yahiin (HMOs) waxaa laguu ogol yahay oo keliya hal ogolaansho gurigiiba. Gaarigaasna waa inuu ku qornaadaa gurigaas.

**Waa maxay ogolaanshaha baarkinka soo booqdayaasha?**

Ogolaanshaha baarkinka booqdayaasha waxaa heli kara dadka degan aaga ay quseyso soo jeedintu.waxaana loo ogolyahay waqti dheer in aay joogi karaan kaas oo ka duwan kii ahaa 3 saacadood bixi oo soo bandhig, waxa ugu badan ay joogi karaan waa 6 saacadood gudahood oo qiimaheedu yahay £2.
Ogolaanshaha baarkinka soo booqdayaasha hore ayaa loo gadan karaa, waxaana laga gadan karaa Meesha baarkinka shanti guriba u dhexeysa. Waqtiyada ay isticmaalayan ma loo baahno in la ogaado maxaa yeelay ogolaanshaha wuxuu ka sameeysan yahay waraaqahah la xoqo taas oo waqtiga saxan taariiqda, iyo saacada laga xoqaayo markaa isticmaaleysid.

**waxaan heystaa meel ka baxsan wadada baarkinka. Ma inaan gataa ogolaanshaha dadka degaanka?**

Haa, hadii gurigaada uu yahay mid ka mid ah kuwa loo ogolyahay iyo gaarigaadana u ku qoran yahay adareeska gurigaada uuna ka mid yahay aaga.

**Ka waran hadii aan heysto baabuurta shaqada?**

Dadka deegaanka oo heysta baabuurta shaqada waa loo ogolaan karaa hadiiba uu baabuurkaas yahay midka aad markasta isticmaasho oo halkii baabuur uu yahay, maadaama u ku jiro aaga baarkin kontroolka.

**Yaa u qalmo ogolaanshaha baarkinka ganacsiga?**

Ganacsi kasta oo ku yaal aaga uu saameeyay waxay codsan karaan ogolaansho barking ganaacsi ah, ma xaddidna inta ogolaansho oo loo ogol yahay, waxaana ogaataa in loo ogol yahay in ay ku kala wareejisan karaan baabuurta kale.

**Ogolaanshaha ganacsiga muxuu uga qiimo duwan yahay kan dadka deegaanka?**

Ogolaanshaha baarkinka ganaacsiga waxaa loo sameeyay in lagu caawiyo ganacsiga xaafadaha lokalka ah taas oo aad muhiim ugu ah baabuurta qiimahana waxaa loogu jebiyay in uu u ahaaado mid ka duwan ka caadiga ah sanad lihii. Qiimaha ogolaanshaha waxaa ku heshiiyay gudiga kadib markii shir ay la yeesheen gudiga ganaacsatada ka hor inta lasoo saarin 2006dii waxaana laga dhimay £50 lacagtii aheyd £650 kadib warkii ay soo saareen gudiga magaalada Glasgow 2018-2019.Ogolaanshaha ganacsiga sanadkii waa £650 waxayna u shaqeysaa sida tan waa wax ka yar £2.50 maalintii ( taas oo ku saleysan shanta beri oo shaqada isbuucii) taas oo ah qiimo dhimis la taaban karo markii loo fiirsho baarkinka caadiga ah, waxaana lagu kala S wareejin karaa baabuurta kale oo ganacsigu leeyahay.

Haduu ogolaanshaha ganaacsiga qiimahiisa laga dhigo £98, wuxuu dhiiri gelin lahaa ganacsiyo badan kuwaas oo oo gadan lahaa tiro badan si ay shaqaalahooda ugu fududeeyaan,tani waxay ka difaaceysaa ujeedadii laga lahaa in llaga ilaaliyo dadka shaqaalaha ah in ay u isticmaalaan baarkinada si ay u dhigtaan baabuurtooda maalintii oo dhan ayna ka aadaan shaqadooda Meesha.

## Guud ahaan

**Tani miyaanay ahayn qorshe lacag sameyn oo keliya?**

Dhaqan gelintu waxay muhiim u tahay joogteynta iyo guusha sharciyada baarkinka.kharashka hirgelinta nidaamka, oo ay kujiraan maamulka, fulinta, dhaqangelinta iyo ilaalinta ayaa loo baahan yahay in laga helo dakhliga kasoo gala qorsheynta.wax walba ka dheeri ah waa in dib loogu maalgeliyaa wadooyinka.

**Nidaamkani ma saameyn doonaa caymiska baabuurkeyga?**

Soo bandhigida kontroolada baarkinka baabuurta wax saameyn ah kuma laha caymiska baabuurta maadaama ay dadka deegaanka ay baabuurta dhigan karaan wadada sida ku xusan caymiska baabuurta.

**Qorshahani ma saameyn doonaa qiimaha gurigeyga?**

Wax cadeyn ah majiro oo sheegaaya in qiimaha gurigaada uu saameyn doono qorshahani. Taas bedelkeeda helitaanka iyo nidaamka baarkinka ayaa bulshada u arkaan in ay tahay kor u qaadista aaga.

Guryaha gooniga ah looma qoondeyn baarkin wadada ah oo u gooni ah taasina sideeda ayeey ahaan doontaa.

**Kawaran kooxaha bulshada ee ka howlgala aaga?**

Baarkinadaan waxaa loogu talo galay in ay bulshada aaga ay u isticmaalaan si caadi ah. Ayadoo saameyn xun ku yeelan baarkinada ay isticmaalaan dadka shaqada u socdo, sidaa

daraadeed kooxaha aaga degan oo ay kamid yihiin kaniisadaha iyo naadiga bulshada waxay iibsan karaan ogolaanshaha baarkinka soo booqdayaasha.

**Wadooyinka malagu calaamadeyn doonaa xariiqyada jaalaha ah?**

Aaga Sighthill xariiqyada waxay ahaan doonta midabka cadaanka oo keliya.

Maadaama nidaamka loo shaqeyn doono uu yahay Aaga Baarkinka Xaddidan (RPZ) , looma baahna xariiqadaha ama calaamadaha jaalaha ah.mar hadii uu baabuurka dhaafo calaamadaha gelitaanka aaga, waxaa dhaqan gelaaya ‘malagu sugi karo waqti kasta; hadaba waxaa lagu ogolyahay in aa baarkinka dhigato oo keliya baarkinada xariiqmaha cad leh taas oo si fiican u muujineysa calaamadahaas.

**Ma dhigan karaa meelaha wax lagu raro ?**

Madhigan kartid meelaha baarkinada wax lagu raro waqtiyada Aaga Baarkinka Xaddidan RPZ.laakiin waxaa dhigan kartaa waqtiyada ka baxsan waqtiyaas.fadlan la soco waa in aad ka dhaqaajisaa intuu aaga waqtigiisa shaqada uu bilaawin hadii kale lagu ganaaxi doonaa layadaoo laguu soo diri doono waraaqda ganaaxa (PCN).

**Maxay sameyn doonaan dadka heysta warqada naafada?**

Dadka heysta warqada naafada waxay dhigan karaan baarkin kasta oo banaan lacag la,aan, ayagoo soo muujinaya warqada naafada, iyo waqti aan xaddineyn. Mana u baahna in ay gataan ogolaansho baarkin deegaan.

## TALAABADA XIGTA

**Maxaa dhacaya oo ku xiga inta howlgalka uu socdo?**

Marxaalada xigta waa soo jeedinta qorshaha oo lagu soo daabicidoono wargeyska maxaliga. soo jeedinta qorshaha waxaa lagu soo bandhigi doonaa wargeyska la yiraahdo Evening times si ogeysiis ah. Waxaa kale oo ogeeysiis lagu soo dhejin doonaa wadooyinka ay marxaladani saameysay. Waxaad ka heli kartaa soo jeedinta qorshahaan xafiisyada golaha bulshada oo ku yaal,231 George Street, iyo aalada internetka ee golaha www.glasgow.gov.uk/proposedtro. Markii soo jeedintaan qorshaha lagu soo xayeeysiiyo golaha waxay ogolaan doonaan qoraalada uga yimaada ku taageerida qorshaha ama diidmada. Sual kasta oo aad qabtid ama inaad wax ka ogaatid hadaa rabtid waxaa noogu soo diri kartaa parkingproposals@glasgow.gov.uk.